# WAXQABADKA

Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta

# 2022 - 2024



01

# DHISMAHA IYO HORUMARINTA DOWLADAHA HOOSE

Wasaaradda oo kaashaneysa dowlad goboleedyada dalka, kana duulaysa baahinta iyo daadejinta awoodaha iyo adeegga, waxaa la dardargeliyay dhismaha goleyaasha deegaanka si dadka loogu dhoweeyo adeegga dowladnimada.

1. Goleyaasha Deegaanka ee la dhisay waxaa ka mid ah; Dhuusamareeb, Cabdudwaaq, Jowhar, Balanballe iyo Buurhakaba.

2. Goloyaasha Deegaanka ee dib loo doortay: waxaa dib loo doortay goleyaasha deegaanka ee Xudur, Warsheekh, iyo Cadaado, ee Koonfur Galbeed, Hirshabelle iyo Galmudug,

Waxaa sidoo kale tababarro loo sameeyay goleyaasha deegaannada ee horay u jiray ee dowlad goboleedyada dalka, iyadoo kor loogu qaaday xirfaddooda aqooneed ee ku aaddan maamul wanaagga, bixinta adeegyada, uruurinta dhakhliga, ka qeybgelinta dadweynaha ee dowladda iyo wacyigelinta bulshada.

Sidoo kale, Wasaaradda ayaa dib-u-eegis ku sameysay hannaanka Qaran ee Dowladaha hoose ee Wadajir, iyada oo wadatashiyo la sameysay Wasaaradaha Arrimaha Gudaha ee Dowlad Goboleedyada iyo maamulka Gobolka Banaadir.



# ADKEYNTA XIRIIRKA WADASHAQEYNTA

## Wasaaradda iyo Heerarka Dowladda (Federaal, Dowlad Goboleed, iyo Dowladaha Hoose).

Si loo adkeeyo xiriirka heerarka kala duwan ee dowladda federaalka ah, dowlad goboleedyada iyo dhammaan heerar kale ee dowladda, Wasaaradda iyo hoogaankeedu waxaa ay qeybweyn ku lahaayeen ajendeyaasha shirarka Golaha Madasha Wadatashiga Qaran.

Dhanka kale, Wasaaraddu waxaa ay kaalin hoggaamineed iyo mid farsamo ku lahayd howlaha; Xasillinta, Dib u heshiisiintta, dhismaha dowladaha hoose iyo federaaleynta dalka.



Si loo dardargeliyo, loona xoojiyo wadashaqeynta iyo xiriirka ka dhaxeeya Wasaaradda iyo Dowlad Goboleedyada, waxaa uu hoggaanka iyo hawlwadeeno ka tirsan Wasaaradda ay safarro shaqo ku tageen dowlad goboleedyada dalka.

Goobaha la booqday waxaa ka mid ah; Gaalkacyo, Kismaayo, Bayadhabo, Jowhar, Laascaanood, Dhuusamareeb, Beledweyne, Buulaburde, Maxaas, Aadan Yabaal, Balcad,Cadaado, Baxdo, Wisil, Xudur, Buulo-xaaji, Marko iyo qaar kale.

0 3

# Xoojinta Wadashaqeynta Wasaaradda ee Hey'adaha Caalamiga iyo Saaxiibada Soomaaliya



Si loo dardargeliyo howlaha Wasaaradda, Wasaaraddu waxaa ay abuurtay jawi wadashaqeyn iyo is aaminaad oo dhexmara iyada, hey'adaha iyo saaxiibada caalamiga ah. Kulamo kala duwan oo labada dhinac ay yeesheen oo loogu qareemayay in maalgelin iyo dhaqaale loogu helo howlaha baaxadda leh ee Wasaaraddu hoggaanka u tahay, waxaa sidoo kale xoogga lagu saaray; iskaashiga labada dhinac iyo wadashaqeynta, arrimaha federaaleynta, doorashooyinka, maamul baahinta , dhismaha golayaasha deegaanka, xasillinta, gargaarka banii'aadanimo, barakacayaasha iyo qaxootiga, hayaanka, u adkeysiga aafooyinka, baahinta adeegyada kala duwan ee looga baahan yahay deegaanada khawaarijta laga xoreeyey iyo howlo ay ka mid ka mid yihiin Dib u heshiisiinta, nabadda, xallinta khilaafaadka, bedqabka dadka iyo deegaanka, nabadgalyada iyo arrimo kale.



# ASTAYNTA AWOODAHA Heerarka Dowladda

Waxaa xusid mudan in heshiiskii golaha wadatashiga qaran lagu gaaray go'aanno la xiirira asteynta awoodaha waxaana loogu kala qeybiyay awoodaha saddexda heer oo dowladda ah kuwaas oo kala ah; Heerka federaalka waxaa uu yeelanayaa 44 awoodood, dowlad goboleedyada 29 awoodood, dowladaha hoose waxaa ay yeelanayaan 31awoodood, halka 19 ay noqonayaan awoodo wadaag ah.

Hadaba si loo taabageliyo heshiiska Astaynta Awoodaha, Wasaaradda oo kaashaneysa xafiiska Ra'iisul Wasaaraha ayaa qabatay kulamo farsamo ay qeyb ka ahaayeen wasaaradaha iyo hay'adaha dowladda feedeeralka si loo furfuro (unbundle) awoodaha iyo mas'uuliyadaha heerarka dowladda (DF, DG, DH,WD), taasi oo hadda lagu guuleystay horusocodsinteda.

# HANNAANKA DOORASHOOYINKA DALKA



Si dalka looga hirgeliyo doorasho qof iyo cod ah wasaaraddu waxa ay diyaarisay xulashooyin ku aadan jiheynta nidaamka doorashooyinka Dalka, iyadoo u fududeysay Golaha Wadatashiga Qaran in ay gaaraan heshiis taariikhi ah oo lagu hiigsanayo dhaqangelinta doorasho guud oo ka dhacda dalka oo dhan kadib muddo haatan laga joogo ku dhawaad 56 sano. Heshiis siyaasadeedkan, waxaa ku jira nooca doorasho (Matalaadda Dheelli-tiran, iyo Liiska Xiran), nooca deegaan doorasho, nidaamka madaxtinimada dalka, u guuridda nidaamka xisbiyada badan oo ku saleysan xaqiijinta matalaad bulsho, horumarinta wadajirka bulshada, iyo ilaalinta midnimada Qaranka.

Waxaa sidoo kale heshiiska lagu qeexay midaynta muddada dooraashooyinka dalka, iyo guddiga loo igmaday maamulka doorashooyinka dalka.

Ka dib ansixintii labada Aqal ee Baarlamaanka JFS ee 4ta cutub ee ugu horeysa dastuurka, Wasaaraddu waxay diyaarisay shuruucdii doorashooyinka sida; Sharciga Dismaha Guddiga Madaxabanan ee Doorashooyinka & Soohdimaha, Dib-u-eegista sharciyada doorashooyionka, iyo Ururada & Axsaabta Dalka kuwaas oo ay ansixiyeen Golaha Wasiirada XFS.



0 6

# DIB-U-EEGISTA ISTIRAATIJIYADA QARAN EE XASILINTA

## iyo Dardargelinta Dadaaladda Xasilinta ee Deegaannada la Xoreeyay



Wasaaraddu waxa ay Dib-u-eegis ku sameysay istiraatijiyada Qaran ee Xasilinta iyada oo la tashi la sameysay dhamaan hay'adaha ku shaqada leh arrimaha Xasillinta oo ay ugu horeeyaan Hay'adaha Dowladda Federalka, Dowlad Goboleedyada, Maamulka, Gobolka Banaadir, Qeybaha Bulshada iyo Hay'adaha iyo Deeqbixiyeyaasha daneeya howlaha xasilinta.

Waxa kale oo wasaaraddu dadaal ku bixisay in la sameeyo qorshe iyo haykal loo dhanyahay ee howlaha xasilinta kala shaqeysay xafiisyada waaweyn ee dowladda sida Xafiisyada Madaxweynaha JFS, iyo kan Ra'iisul Wasaaraha XFS,. Qorshahaan oo la daahfuray bishii Juun 2023, waxaa laga taabo geliyay Dowlad Goboleedyada dalka.

Iyada oo laga duulayo tiirarka waaweyn ee xukuumada Dan Qaran gaar ahaan tiirka Dib-u-xoreynta iyo Amniga, iyo isla jaanqaadka dadaaladda dib-u-xoreynta iyo xasilinta, waxaa la gaaray guulo taariikhi ah oo ka dhashay dagaalka ka dhanka ah Khawaarinta kaas oo ay iska kaashadeen Dowladda iyo dadka deegaanka, iyada oo lagu xoreeyay degmooyin iyo deegaanno in badan kujiray gacanta Khawaarijta.

Degmooyinka iyo deegaannada la xoreeyay waxaa ka mid ahaa dhanka Dowlad Goboleedka Hirshabeelle: Adanyabaal, Masjid Cali Gaduud, Guulane, Alkowthar, Nuur Dugle, Ruunirgood, Moqokori, Tardo, Teedaan,Yasooman, Abooray, Booco, Ceel la helay, Cali Ganey, deegaano ku teedsan Degmooyinka Maxaas, Matabaan, Buulo-Burde iyo Jalalaqsi.

Dhanka Galmudug: waxaa lagu guuleystay in Khawaarijta laga saaro Cado-kibir, Qaayib, Dhuumoodle, Masagawaa,Wisil, Xarardheere, Baxdo, Ceeldheer iyo Galcad.

Dhanka Jubaland waxaa laga xoreeyey khawaarijta deegaano ay ka mid yihiin Buullo Xaaji iyo deegaanno kale oo ka tirsan Gobolka Jubbada hoose.

Dhammaan deegaanadaasi kor ku xusani, waxaa ay yeesheen maamullo KMG ah heer degmo oo wadatashi bulsho ku yimid kuwaas oo ka shaqeeya soo celinta adeeg bixinta dowladeed sida sugidda amniga, sareynta sharciga, helidda adeegyada aasaasiga ah, iyo gaarsiinta gargaarka.

Waxaa deeganadaas laga hirgeliyay mashaariic kala geddisan oo kaabaya nolosha dadka oo tiro ahaan gaaraya 300 oo mashruuc, oo ay ugu waaweyn yihiin; Wacyigelinta bulshada, gargaarka, dayactirka xarumaha dowladda, hirgelinta nidaamyada garsoorka, baahinta adeegyada dowladda, gelinta layrarka ileyska cadcadeeda ku shaqeeya, qodista iyo dayactirka ceelasha biyaha, waxbarashada, caafimaadka iyo gaarsiinta howlaha gargaarka.

07



# Diyaarinta Sharciyo, siyaasado iyo istiraatiijiyado muhiim ah

Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u Heshiisiinta waxay ku guuleystay in dib u eegista lagu sameysay siyaasadaha iyo istaraatiijiyadaha kala ah:

- Istaraatiijiyadda qaran ee xasilinta.
- Hannaanka Qaran ee Dhab-u-heshiinta
- Istaraatiijiyadda Qaran ee ka qeyb-galka haweenka ee Dowladaha hoose.

Qoraalka hoose, ayaa soo koobaya sharciyada kala duwan oo ay ka shaqeysay Wasaaradda Arrimaha Gudaha 2022-2024.

## Hindise Sharciyeedyada Wasaaradda ee Golaha Wasiiradu ansixiyeen.

- Hindise Sharciyeedka Aqoonsiga & Diiwaangelinta Dadweynaha (NIRA)
- Hindise Sharciyeedka Ilaalinta & takulaynta Barakacayaasha"
- Hindise Sharciyeedka Qaxootiga & Magangalyo doonka "
- Hindise Sharciyeedka Dad dhigista & Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah
- Hindise Sharciyeedka Guddiga Dhismaha Guddiga Madaxa Banaan ee Doorashooyinka iyo Soodimaha
- Hindise Sharciyeedka Doorashooyinka Dalka
- Hindise Sharciyeedka Ururada iyo Axsaabta Siyaasadda dalka.

# SOO NOOLEYNTA HOWLAHA DAD-DHIGISTA IYO CASRIYAYNTOODA

Waxaa ay Wasaaraddu ku guuleystay adkaynta xiriirka daneeyayaasha dad-dhigista iyo tirakoobka xaaladaha madaniga ah iyadoo la raacayo sida ku cad siyaasadda qaran ee Dad-dhigista iyo tirakoobka xaaladaha madaniga ah.

Sidoo kale, waxaa markii ugu horeeysay ay Wasaaraddu qabatay kulanka Guddiga heer Wasiir ee Hagidda Dad-dhigista. Dhanka kale, Wasaaraddu waxaa ay horumar ka sameysay dhameystirka shuruucda dad-dhigista si guud iyadoo wadatashiyo la xiriira qabyo qoraalka sharciga iyo habraacyadiisa lala yeeshay saamilayda horumarinta Nidaamka Diiwaangelinta Madanigaa Iyo Istaatistikada Muhiimkaa.



Waxaa sidoo kale Wasaaradda u suurtogalay diyaarinta foomam iyo shahaadooyin mideysan oo khuseeya dhacdooyinka dad-dhigista kuwaa oo asaas u noqon doona hab-dhismeedka shaqo ee barnaamijka elektorooniga ah ee dad-dhigista Qaranka.

Wasaaraddu waxaa ay dhaqan gelisay nidaamka diiwaangelinta xafiisyada dad-dhigista iyo saxiixayaasha cadeymaha dad-dhigista ee dowladaha hoose ee dalka iyo xaqiijinta sax ahaanshaha cadeymaha Marka loo baahdo. Sidoo kale, waxaa guulo laga gaaray naqshadaynta barnaamijka danabeysan ee Dad-dhigista dalka hey'adda NADRA(Pakistan) ay ka caawineyso Wasaaraddu diyaarintiisa.

Wasaaraddu waxaa ay sameysay daraasad ballaaran lagu sahminayo nidaamka dad-dhigista dalka sida uu hadda u shaqeeyo (comprehensive assessment), taa oo asaas u noqon doonta qorshaha istraatiijiyadda qaran ee dad-dhigista dalka 5ta sano ee soo socota.

09

# Dib-u-eegista Hannaanka Dhab u heshiinta Qaran

HDQ waa siyaasad, istraatiijiyad iyo habraac la isku raacsan yahay oo ay wasaaraddu ku shaqeyneysay 5tii sano ee lasoo dhaafay, wuxuuna gun-dhig iyo hage u ahaa dadaalada dhab-u-heshiin qaran.



HDQ

Waxaa la soo gababeeyey wajigii hore ee hirgelinta qorshaha hannaanka dhab-u-heshiinta qaran oo ay wasaaraddu ka shaqeynaynaysay sanadihii lasoo dhaafay ee (2019-2022). Haddaba si la isku waafajiyo hannaankan iyo hal ku dhigga xukuumadda Dan-qaran ee Soomaali heshiis ah, waxaa ay Wasaaraddu dib u eegis ku sameysay Hannaanka Dhab-u-Heshiinta Qaran iyo qorshihiisa fulineed.

Waxaa wadatashiyo baahsan lala yeeshay dhammaan daneeyeyaasha oo ay ugu horeeyaan wasaaradaha arrimaha gudaha ee dowlad goboleedyada, Maamulka Gobolka Banaadir iyo qeybaha kala duwan ee bulshada.

Sidoo kale, wasaaradda ayaa diyaarisay Qorshe istaraatiijiyadeed ee 5ta sano soo socota ee Hannaanka Dhab-u-heshiinta Qaran (2025-2029) oo ay qeyb ka yihiin dhamaan saamliyeda howlaha nabad-dhiska iyo dib-u-heshiisiinta Dalka

10

# BANAYNTA XARUNTA WASAARADDA



Waxaa dadaal badan lagu bixiyay sidii loo banyan lahaay Xarunta wasaarada Arrimaha Gudaha taas oo ku soo dhamaatay guul, sidoo kale waxaa loo diyaar garoobay dhismaha xarunta cusub ee Wasaaradda kaas oo ku soo dhamaan doono mudo kooban.



# Aasaaska iyo Hawl gelinta Hey’adda Diiwaangelinta iyo Aqoonsiga (NIRA)

## *Waxqabadka Hey’adda Diiwaangelinta iyo Aqoonsiga (NIRA)*

Wasaaradda waxaa ay ku guulaysatay, isla markaana ay howlgelisay hey’adda Diiwaangelinta iyo Aqoonsiga ee (NIRA).

Hay’adda Aqoonsiga iyo diiwaangelinta Qaranka waxaa lagu dhisay sharci L.3 soo baxay 2023, waxayna u xilsaaran tahay bixinta Aqoonsiga Qaranka oo muhiim u ah ilaalinta amniga, la dagalaanka garanwaaga, fududeynta helidda adeegyada dowladeed iyo kuwa gaarka ahba.

Si loo dardargeliyo howlahaasi, Hey’addu waxaa loo sameeyay maamul cusub, halka ay qoratay shaqaale tayo leh, la tababaray, lana diyaariyey Nidaamka Maareynta Aqoonsiga Qaranka (Somalia National ID System) iyada oo ay hadda si hambsami Caasimadda Muqdisho iyo qaar ka mid ah dowlad goboleedyada ay ka socdaan Diiwaangelinta dadweynaha.






# Hey’adaha hoostaga Wasaaradda

## Dib u hawlgelinta Hay’adda Maareynta Musiibooyinka (SoDMA) iyo Kajawaabidda Baahiyaha Gargaarka

Si looga jawaabo abaarata iyo musiibooyinka kale, Wasaaradda waxaa ay ku guuleystay Dib u hawlgelinta Hay’adda Maareynta Masiibooyinka Soomaaliyeed (SoDMA) iyo la wareegidda Dhammaan Shaqaalaha iyo Xarumaha Wasaaradii hore ee Gargaarka iyo Maareynta Masiibooyinka. Si arrimahaasi loo sii dardargeliyo, waxaa sidoo kale la howlgeliyay xarunta qaran ee howlgallada gurmadka degdegga ah, iyada oo la hoosgeeyey Hay’adda Maareynta Masiibooyinka Soomaaliyeed (SoDMA).

Hay’adda waxa ay ku guuleystay in ay dhisto xarunta dhexe ay hay’adda ku shaqayn lahayd , ayada oo marki dib loo yegleelay, la wareegtay Xarun kiro ah oo lacagta kirada bixiso hay’adda UNDP.

Nasiib wanaag dadaal dheer iyo juhdi badan oo ay bixiyeen Hogaanka sare ee wasaaradda, hay’adda waxaa ay yeelatay xarun dhexe oo loo dhisay si heer sare ah loona qalabeeyay, iyada oo ay ku howlgalaan Guddoonka hay’adda, qaar ka mid ah agaasimayaasha Hay’adda , la taliyayaasha iyo khubarada laf dhabarka u ah hay’adda.

SoDMA waxaa ay ku guuleystay abaaro iyo musiibooyinka dabiici ah iyo qaar kale oo dhahay wixii ka dambeeyey 2021-kii, iyada oo badbaadisay malaayiin u baahnaa gargaar degdeg ah kuwaas oo ku nool goobaha abaaraha iyo musiibooyinka ka dhaceen iyo deegaannada laga xoreeyey Khawaarijta.






Hey'adaha hoostaga Wasaaradda

# Dardargelinta Howlaha Hey'adda
## Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka



Hey'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka waxaa lagu sameeyey Dib u habeyn maamul iyo shaqo, waxaana lagu guularystay meelmarinta shuruuc muhiim ah oo ay ka mid yihiin Qaxootiga iyo Magangalyo-doonka iyo midka Barakacayaasha.

Waxaa kale lagu guuleyastay; Samaynta Siyaasadda Qaran ee Qaxootiga soo guryo noqonaya iyo Barakacayaasha Gudaha,



- Samaynta Xeernidaamiyaha Qaran ee kasaaridda Dadka Hoy/Guri ay degen yihiin,
- Samaynta Borotokoolka kumeel gaarka ah ee qeybinta dhun dadka muteysta ee Qaxootiga soo guryo nononaya iyo Barakacayaasha Gudaha,
- Tababaridda macalimiinta xalka waara, heer federal iyo mid dowlad goboleed intaba.